

# Doorshooyinka Daawaynta Bukaana Covid-19

## Daawaynta Monoclonal Antibody

### Waa maxay daawaynta monoclonal antibody?

Monoclonal antibodies are antibodies lagu sameeyay shaybaadhka. Antibadiyadaasi waxay u shaqeeyaan sida antibadiyada dabiiciga ah, kuwaasoo ah booratiino uu sameeyo jidhkeenu si uu ula dagaalamo fayraska.

Monoclonal antibodies xididka ayaa laga siiyaa (loo marinayo xididka dhiiga) waxaana lagu siiya xarumaha daryeelka caafimaadka. Daawayntan waxa ogolaaday Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka (FDA) iyada oo la raacayo Ogolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) halka daraasaadka caafimaadku sii wadaan inay eegaan faa'iidadooda iyo badqabka.

### Maxaan u qaadanayaa daawaynta monoclonal antibody?

Hadii lagaa helay xanuunka COVID-19 oo aad leedahay calaamado sahlan, helitaanka daawaynta monoclonal antibody sida ugu dhakhsaha badan uguna macquulsan waxay kaa caawin doontaa **yaraynta** kuwan soo socda:

- Calaamadaha daran
- Heerka cusbitaal dhigista
- Xadiga fayraska ee uu qaadi karo shaqsigu xanuunka qabaa

### Goorma ayaan helayaa daawaynta monoclonal antibody?

Daawaynta monoclonal antibody aad bay faa'iido u leeyihiin haddii la siiyo sida ugu dhakhsaha badan ka dib marka shakhsi laga helo COVID-19 (10 maalmood gudahooda ee bilawga astaamihiisa).

### Yaa u qalma daawayntan?

Qof kasta (12 sano iyo ka weyn) oo laga helay COVID-19 IYO leh calaamado sahlan ama dhexdhexaad ah La tasho bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga si aad u go'aamiso haddii aad u qalanto daawaynta. Daryeel bixiyahaaga caafimaadku wuxuu u baahan doonaa inuu xaqiijiyo oo uu sugo baadhistaadaa sheegaysa in lagaa helay xanuunka.

**Hadii aad hayso wax su'aalo dheeraad ah, tabashooyin iyo/ama baahiyo tilmaam dheeraad ah oo lagu dalbanayo daawayn ama bukaano la gudbinayo la xidhiidh NDDoH Xarunta Waaxda Qaliimada (DOC) adoo kala xidhiidhaya 701-328-0707.**

Waa maxay saamaynta qarsoon ee daawayntan?

Saamaynta caadiga ah waa lallabbo, dawakhaad, cuncun iyo finan.

Ilaa iyo markii daawadan laga siiyay xididka, dadka qaar waxay waajahaan xanuun sahan, dhiig bax, maqaarka oo boog yeesha, nabaro, barar iyo caabuqa suurtoogalka ah ee goobta faleebada.

Sidee iyo goobtee ayaan ka heli karaa daawayntan?

**Arag bixiyaha daryeelkaaga caafimaad si aad u hesho daawaynta warqad iyo tixraac** ku socda goobta caafimaadka ee North Dakota taas oo bixinaysa daawaynta monoclonal antibody.

Ka eeg halkan [Khariirada xarunta daryeelka caafimaad ee North Dakota taasoo bixinaysa daawaynta monoclonal antibody.](#)

Intee baan ku bixinayaa daawayntan/ma waxaa daboolay caymiskayga?

Dawlada fadaraalku waxay qaybinaysaa agab antibadhiyo aan wax kharash ah laga qaadayn bukaanada. Inta badan caymiska gaarka loo leeyahay ayaa daboolaa kharashka daawayntan. Si kastaba ha ahaatee, hadii aanad haysan kabka caymiska ama aanad caymisnaynba, ka hubi goobta daawaynta hadii ay jiraan wax lacag ah oo la iska qaadayo.

<https://combatcovid.hhs.gov/available-covid-19-treatment-options>

Miyaan heli karaa talaalka COVID-19 kadib markaan qaato daawaynta monoclonal antibody?

Wali ma garanayno sida uu wax uga qaban karo talaalku qof horey ugu qaatay daawaynta antibody ee xanuunka COVID-19 ama haddii daawaynta antibody ay faragelin karto jawaabta difaaca jidhkaaga ee tallaalka. Si kastaba ha ahaatee, marka aad qabto COVID-19, aad uma badna inaad dib u qaado saddex bilood ka dib. Haddii aad heshay daawaynta antibody, waa in aad dib u dhigto qaadashada tallaalka 90 maalmood si taxadar leh.

Ilaha:

Daawada COVID-19: Waaxda Caafimaadka ee North Dakota (<https://www.health.nd.gov/covidtreatment>)

Dooroshoyinka Daawaynta COVID-19: Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (<https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/meds.html#what>)

**Hadii aad hayso wax su'aalo dheeraad ah, tabashooyin iyo/ama baahiyo tilmaam dheeraad ah oo lagu dalbanayo daawayn ama bukaano la gudbinayo la xidhiidh NDDoH Xarunta Waaxda Qaliimada (DOC) adoo kala xidhiidhaya 701-328-0707.**

Dib loo eegay 11/30/2021